

Hagaha doorashada federaalka



 *C'est notre vote*

Booqo elections.ca ee macluumaadka rasmiga ah ee cod bixinta
iyo tallaabooyinka caafimaadka iyo badbaadada ee diyaarka ah

1-800-463-6868 / elections.ca / TTY 1-800-361-8935

Caafimaadkaaga iyo badbaadadau waa ahmiyadayada


Xaga goobtaada codbixinta, shaqaalaha codbixinta waxay xidhin doonaan maaskareetooinka. Waxaa jiri doono sidoo kale:



Nadiifiyaha gacmaha istaanada



Calaamadasiyaha kala foigaanshaha jidka ee cad



keliya hal shaqaalaha cidbixinta ah miiskiiba jooga muraayada ka dambaysa


Markaad so codayso, ha iloobin:



Xidho maaskareeti



Waxaan ku siin doonaa qalan bensalka isticmaalka kelya ah si loo calaamadeeyo warqadda cod bixinta ama waxaad soo qaadan kartaa qalinkaaga ama qalin beensalka.



Ku dhaqan kala fogaanshaha jidh ahaaneed addoo u jirsanaya ugu yaraan 2 mitir away from voters iyo shaqaalaha cod bixinta.

Haddii cudurka lagaa helay ama aad qabto astaamaha ee COVID-19, ama haddii aad la xidhiidhayso qof qaba fayraska, booqo elections.ca si aad u codsato inaad ku codayso boostadda.

Buug yaraha waxaa lagu heli karaa luqadda badan bogga **elections.ca**.

Qaababkakale, sida farta indhoolaha, daabacaada wayn iyo DAISY, naga soo wac **1-800-463-6868** ama **1-800-361-8935 (TTY)**.

Hubso inaad ka diiwaan gashayn tahay si aad u hesho

Carte d'information de l'électeur	Voter Information Card					
<p>Élection fédérale</p> <p>Pour voter, vous devez :</p> <ul style="list-style-type: none">être citoyen canadienavoir au moins 18 ans le jour de l'électionprouver votre identité et votre adresse <p>Visitez elections.ca pour connaître les pièces d'identité acceptées.</p> <p>Apportez cette carte et vos pièces d'identité pour faciliter le vote.</p> <p></p>	<p>Federal Election</p> <p>To vote, you must:</p> <ul style="list-style-type: none">be a Canadian citizenbe at least 18 years old on election dayprove your identity and address <p>Visit elections.ca to know what ID is accepted.</p> <p>Bring this card with you, along with ID, to make the voting process easier.</p> <p></p>	<p></p> <p>POSTES CANADA POST</p> <table border="1"><tr><td>Postage Postage Poste-jeux</td><td>Postage Postage Lettermail</td></tr><tr><td colspan="2">3122778</td></tr></table> <p>Nom ou adresse incorrects? Vérifiez votre inscription à elections.ca.</p> <p>Incorrect name or address? Check your registration at elections.ca.</p> <p></p> <p>À l'électeur : DOE, JOHN 123, RUE MAIN ANYTOWN ON K1A5T7</p> <p>To the Elector : DOE, JOHN 123 MAIN STREET ANYTOWN ON K1A5T7</p> <p>35012 093-0 98</p>	Postage Postage Poste-jeux	Postage Postage Lettermail	3122778	
Postage Postage Poste-jeux	Postage Postage Lettermail					
3122778						

Haddii aad diiwaangashan tahay, waa inaad ku heshaa kaadhka maclumaadka codeeyaha boostadda ka dib doorashada marka lagu baaqo. Waxay kuu sheegtaa halka iyo goorta aad codayn karto. Soo qaado kaadhka, oo uu la socdo Kaadhka Aqoonsiga, si loo fududeeyo nidaamka cod bixinta.

Haddii aanad kaadh helin, ama haddii maclumaadku ay khalad yihiin, waa inaanad iska diiwaangelin ama maclumaadkaaga cod bixiyahu waxa laga yaabaa inaanu cusbayn. Booqo **elections.ca** si aad u diiwaangeliso ama u cusboonaysiiso cinwaankaaga, ama naga soo wac **1-800-463-6868** ama **1-800-361-8935 (TTY)** wixii caawimo ah. Wuxaad sidoo kale iska diiwaangelin kartaa ama ka cusboonaysiin kartaa marka aad cod bixinayso.

Si aad isku diiwaangeliso oo u codayso doorashada federaalka, waa inaad:

- tahay muwaadin Kanadiyaan ah
- ahow ugu yaraan 18 sanadood jir maalinta doorashada.
- aad cadayso aqoonsigaaga iyo cinwaanka

Qaababka loo codeeyo

Waxaad codayn kartaa ugu badnaan wakhti kasta muddada doroashada.
Dooro doorashada cod bixinta adia aad kuugu habboon.

1 Maalinta cod bixinta

Goobta cod bixinta laguu qoondeeyay waxay furnaan doontaa 12 saacadood (saacadahu waxay ku kala duwan yihiin aagaga wakhtiga).

Hubiso **kaadhkaaga macluumaaadka codbixiyaha** wixii ah halka iyo goorta aad codaynayso.

2 Maalmaha codayta hore

Goobtaada cod bixinta loo qoondeeyay way furnaan doontaa laga bilaabo 9:00 subaxnino ilaa 9:00 habeeno Jimcaha, Sabtida. Axada iyo Isniiinta todobaad ka hor maalinta doorashada.

3 Boos ahaan

Ka codso Salaasada ka hor maalinta codaynta, 6:00 fiidnimo Waxaad codayn doontaa addoo isticmaalaya nidaamka cod bixinta gaarka ah. Hubi inaad hesho warqadda codaynta calaamadsan **maalinta doorashada**, ama waa la tirin karaa. Booqo **elections.ca** wixii macluumaaad dheeraad ah muddooyinka loo qabtay iyo si loo arko haddii cod bixinta boostadu ay tahay doorashada kuugu wanaagsan adiga.

4 Xafiiska Doorashooyin kasta oo Canada dhammaan Canada

Booqo xafiis kasta oo Doorashooyinka Canada dhammaan Canada Salaasada ka hor maalinta doorashada 6:00 fiidnimo. Waxaad ka codayn doontaa isticmaalka nidaamka cod bixinta gaarka ah. Ka dib doorashada marka lagu baaqo, booqo **elections.ca** ama na soo wac si aad u hesho xafiiska Doorashada Canada ee adiga kuugu dhow.

Markaad codsato cod bixinta boos ahaan ama xaga xafiiska Doorashooyinka Canada,
Waa qaabka **keliya** ee aad ku codayn karto doorashadan.

Diyaarso Aqoonaaga si aad u codayso

Waxaad haysataa saddex doorasho si lagu caddeeyo aqoonaaga iyo cinwaanka.

Si aad u codayso, waa inaad tahay muwaadin Kanadiyaan ah iyo ugu yaraan 18 sano jir maalinta doorashada.

Ikhtiyaarka

1



Tus mid ka mid ah qaybahan aqoonaiga

- liisankaaga darawalnimada
- kaadh kasta oo kale oo ay soo saartay dowlada Kanada (federaaliga, gobolka/dhulka ama degmo) oo wata sawirkaga, magaca iyo cinwaanka la degenyey hadda.

ama

Ikhtiyaarka

2



Tus labba qaybood oo Aqoonaiga ah

Labbaduba waa inay haystaan magacaaga iyo ugu yaraan hal waa inuu hayo cinwaankaaga hadda.

Tusaalooyinka:

- kaadhka macluumaadka codeeyaha iyo warbixinta baanka.
- biilka nalka iyo korontada iyo kaadhka Aqoonaiga ardayga

Kuwan miyaad haysataa? Dhibaato ma laha!

Waxaa jira qaybo kale oo la aqbali karo oo Aqoonaiga ah.
Ka hubi liiska buuxa bogga **elections.ca**

ama

Ikhtiyaarka

3



Haddii aanad haysan Aqoonsi

Weli waxaad u codayn kartaa haddii aad ku dhawaaqdo aqoonaaga iyo cinwaanka qoraal ahaan oo leeyahay qof ku garanaya oo loo poondeeyay goobtaada cod bixinta inuu ku xaqijiyo adiga.

Caddeeyahu waa inuu awood u yeeshaa inuu caddeeyo kaadhkooda aqoonaiga iyo cinwaanka. Qofka waxa uu xaqijjin karaa keliya hal qof (laga reebo xarumaha daryeelka xiliga dheer).



Agabka caawimada cod bixinta iyo adeegyada



Dhammaan doortayaasha waxaa loo qoondeeyay goobaha cod bixinta maalinta doorashada iyo maalmaha cod bixinta ka horaysa. Ka dib doorashada marka lagu baaqo, hubso goobta codbixinta laguu qoondeeyay ay buuxinayso baahiyahaaga gaadhida meesha. Si loo ogado sida loo gaadhi karo:

- Hubi macluumaadkaaga kaadhka cos bixiyaha
- Booqo **elections.ca** oo geli lambarkaaga boosta bogoska Adeega Macluumaadka Cod bixiyaha, ama
- Naga soo wac t **1-800-463-6868** ama **1-800-361-8935 (TTY)**

Haddii aad walacyo ka qabto ku saasban gaadhida goobtaada cod bixinta laguu qoondeeyay, naga soo wac **1-800-463-6868** ama **1-800-361-8935 (TTY)**.

Si aad u codsato caawimada cod bixinta, ay ku jiraan luqadda iyo turjumaada luqadda ishaarada, soo wac xafiiska Doorasahda Kanada raacitaankaaga Salaadada ka hor maalinta doorashada, 6:00 fiidnimo.

Agabka caawimada cod bixinta iyo adeegyada maalinta doorashada



Warqadaha cod bixinta wayn
magacyada murashaxa oo ku qoran far waa wayn




Luqadda iyo turjumaadka luqadda ishaarada (iyo caawimada kale marka la codsanayo ee hore)



Farta qoraalka waa wayn iyo liisaska ku qoran farta indhoolaha ee murashaxiinta



Caawimada cod bixinta warqaddaada cod bixinta
(Keen qof aad garanayso ama waydiiso shaqaalaha doorashada)



nidamka wax akhriska indhoolaha nashaqada cod bixinta



Beensalka qabsashada wayn lej
(tiro xadidan) Wuxaan sidoo kale soo qaadan kartaa qalanikaaga ama qalin beensalka



Waynaysooyinka (4x)



Hagaha saxeexa

Fiiro: Liisaska murashaxiinta ku qoran farta indhoolaha waxaa keliya la heli karaa maalinta doorashada. Daabacaada wayn waxaa la heli karaa ka hor maalmaha cod bixinta iyo maalinta doorashada/